

# Ka hel Helsinki waxqabadka wakhtiga firaaqada

Magaalada Helsinki waxay wakhtiyada firaaqada ah qabanqaabisaa waxqabadyo badan oo raqiis ah iyo kuwa lacag la'aan ah. Sii indha-indhee maktabadaha, xarumaha dhaqanka, goobaha jimicsiga, xarumaha dhallinyarada, madxafka magaalada iyo fursadaha kale ee wakhtiga firaaqada.



Sawirka: Karun Verma



Sawirka: Maarit Hohteri



Sawirka: Suvi-Tuuli Kankaanpää

Internetka ayaad sidoo kale ka heleysaa xayeesiinta:
**hel.fi/static/julkaisut/kulttuuri-vapaa-aika/vapaa-ajan-esite-SO.pdf**

Sawirka daboolka: Jussi Hellsten, Tusaaleyn: Lille Santanen

# Tusmada

Maktabad.......................................4
Dhaqan ..........................................8
Jimicsiga ...................................... 14
Jardiinooyinka ciyaarta.................20
Waxqabad dhallinyarada loogu talagalay.......................................22
Madxafka magaalada Helsinki .......26
Waxbarashada weligeed socota ....28
Waxaad sidoo kale indha-indhaysaa fursadahan wakhtiga firaaqada.....30



Sawirka: Suvi-Tuuli Kankaanpää

# Maktabaddu waa meel dadka oo dhan u furan

Waxaad maktabadda ku akhrin kartaa tusaale ahaan buugaag iyo jaraa'idyo luqado kala duwan ku qoran afka finnishkana waad ku baran kartaa. Waxaad sidoo kale maktabadda ka amaahan kartaa buugaag aad gurigaada u qaadanayso. Joogitaanka maktabadda iyo amaahashada buugaagtu wax lacag ah ma ahan. Waxaa Helsinki laga helaa isugeyn 38 maktabadood iyo labo baabuur maktabadeed.

## Wakhti ku qaado maktabadda

Maktabadaha badankood waxay furan yihiin maalmaha shaqada subaxdi illaa fiidki iyo weliba Sabtida. Waxaa sidoo kale Helsinki ku yaal maktabado Axadda furan. Si xor ah ayaad wakhtiga ugu qaadan kartaa maktabadaha. Tusaale ahaan waxbaad ku baran kartaa, qolal aad isticmaasho ayaad ka qabsan kartaa kambuyuutarada maktabaddana waad ku isticmaali kartaa. Shaqaale ayaa markasta maktabadaha jooga, kuwaas oo aad weydiin karto talooyinka arrimaha nooc kasta ah. Qasab kuguma ahan in aad taqaan af finnish ama iswiidhish. Shaqaale badan oo luqado yaqaan ah ayaa maktabadaha jooga. Xittaa haddii aan la helin luqad aad wadaagtaan, shaqaaluhu waxay inta karaankooda ah kaa caawinayaan in aad horay u socoto.

## Amaahashada

Si aad buugaagta u amaahato, waxaad u baahantahay kaarka maktabadda. Ka sokow buugaagta, waxaad kaarka maktabadda ku amaahan kartaa sidoo kale jaraa'idyada, muusikada, filimaanta iyo agabka. Waxaad kaarka maktabadda ka codsan kartaa maktabadaha Helmet oo dhan. Kaarka maktabadda ee koowaad markasta waa lacag la'aan. Soo qaado aqoonsi marka aad kaarka maktabadda codsadanayso. Waxaa aqoonsi noqon kara kaarka aqoonsiga ee wadamada Midowga Yurub, baasaboor, laysinka Finnishka, kaarka KELADA ee sawirka leh (xittaa dadka kayar 18 sano waxaa ku filan kaarka KELADA ee aan sawirka lahayn), kaarka degganayaasha ee xerada qaxooyiga ee Finland ku taal iyo baasaboor iyo weliba kaarka sharciga degganaanshaha ee uu hoggaanka socdaalku bixiyo. Si aad u hesho kaarka maktabadda, waa inaad leedahay cinwaan Finland ku yaal.

## Maktabadaha Helmet

Helmet waa adeegga maktabadda ee ka dhexeeya soonaha caasimadda. Maktabadaha Helmet waa maktabadaha magaalooyinka Helsinki, Espoo, Kauniainen iyo Vantaa. Haddii aad heysato kaarka maktabadda Helmet, waxaad buugaag ka amaahan kartaa maktabadaha Helmet oo dhan. Celinta buugaagtu waa mid fudud, sababtoo ah waxaad ku celin kartaa buugaagta maktabad kasta ee Helmet ah.

→ Maktabadda shabakadda ee Helmet: **helmet.fi**



Sawirka: Suvi-Tuuli Kankaanpää

**40**

Waxaa Helsinki laga helaa isugeyn 38 maktabadood iyo labo baabuur maktabadeed.

# Todobo war oo ku saabsan maktabadda

## 1. Kafateeriyada luqadda



Sow finnish yar ma taqaanid? Ka qaybgal kafateeriyada luqadda ee maktabadda! Waxaad kafateeriyada luqadda ku horumarin kartaa aqoontaada afka finnishka adigoo kula sheekeysanaya ka qaybgalayaasha kale.

## 2. Buugaagta ku qoran luqadda fasiixa ah

Waxaad maktabadda ka amaahan kartaa buugaagta ku qoran luqad fudud ama waxaad ka akhrisan kartaa jaraa'idyo ku qoran luqad fudud. Luqadda fasiixa ah waa af finnish fudud.

## 3. Buugaag ku qoran luqado kala duwan

Maktabad kasta waxaa yaal buugaag ku qoran luqado kala duwan. Maktabaduhu waa ku kala duwan yihiin waxyaabaha yaala: waxaa laga yaabaa in tusaale ahaan hal maktabad laga helo buugaag badan oo ku qoran luqadda carabiga, halka mid kale ay yaalaan buugaag u badan luqadda ruushka. Maktabadda Pasila waa maktabad Luqado badan, Waxyaabaha yaal waxay ku qoran yihiin in ka badan 80 luqadood, intooda badan waa luqado kale oo aan ahayn kuwa reer Yurub. Waxaad imaan kartaa maktabadda Pasila si aad u indha-indheyso noocyada yaal maktabadda Luqadaha badan. Waxaad sidoo kale maktabadda shabakadda ee Helmet ka raadin kartaa buugaag, jaraa'idyo iyo codad duuban oo luqado kala duwan ah waxaad si lacag la'aan ah u dalban kartaa in maktabaddaada laguugu keeno.

## 4. Amaahashada alaabta iyo isticmaalka qalabka

Ka sokow buugaagta, jaraa'idyada, waxaad tusaale ahaan gurigaada u amaahan kartaa ciyaaraha, qalabka muusikada, qalabka farsamada gacanta iyo qalabka jimicsiga. Waxaa sidoo kale maktabadda yaal qalab kala duwan oo ay macaamiishu si lacag la'aan ah u isticmaali karaan. Maktabad kasta waxaa lagala helaa kambuyuutaro aad ku geli karto kaarka maktabadda. Qalabyada kale ee la isticmaali karo waa tusaale ahaan taablet, harqaan, daabicista 3D iyo leysarka wax jara.



## 5. Ka caawinta qalabka dijitaalka ah iyo daabacista dukumentiyada

Shaqaalaha maktabadda ayaa kaa caawinaya isticmaalka kambuyuutarka, telefoonka casriga ah iyo internetka. Waxaad maktabadda ku daabacan kartaa, iskaan ku marin kartaa kuna koobiyeysan kartaa dukumentiyada. Waxaa sidoo kale maktabadaha lagu qabanqaabiyaa dhacdooyin lacag la'aan ah oo ay khabiiro ku bixinayaa talooyin ku saabsan isticmaalka qalabka iyadoo la adeegsanayo af finnish, iswiidhish iyo ingiriis.

## 6. Qolalka kooxaha iyo istuudiyaha


Waad ku shaqaysan kartaa ama waxaad ku qabanqaabin kartaa tusaale ahaan kulan qolalka kooxaha ee maktabadda. Waxaa sidoo kale maktabadaha ku yaal qolal muusikada lagu garaaco iyo istuudiyoyaal. Waxaad tusaale ahaan halkaas ku samayn kartaa muusik, waxbaad ku sawiri kartaa ama fiidiyowyo ayaad ku hagaajin kartaa. Waxaad qolka ka qabsan kartaa Varaamo (faahfaahin dheeraad ah ka sii akhri bogga 30).

## 7. Wakhtiyada sheeka-xariirooyinka iyo dhacdooyinka kale

Waxaa maktabadaha lagu qabanqaabiyaa dhacdooyinka kala duwan oo lacag la'aan ah, sida wakhtiyada sheeka-xariirooyinka, booqashooyinka qoraaga, hoosado iyo bandhigyo yaryar. Ka sokow afka finnishka iyo iswiidhishka, luqado kala duwan ayaa sheeka-xariirooyinka lagu qabanqaabiyaa, tusaale ahaan afka Soomaaliga.

**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Makatabad | Kirjasto |
| Buug | Kirja |
| Akhrin | Lukea |
| Amaahasho | Lainata |
| Kaarka maktabadda | Kirjastokortti |




## Xarumaha dhaqamada

1. Kanneltalo oo ku taal Kannelmäki, **kanneltalo.fi**
2. Maunula-talo oo ku taal Maunula, **maunulatalo.hel.fi**
3. Malmitalo oo ku taal Malmi, **malmitalo.fi**
4. Stoa oo ku taal Itäkeskus, **stoa.fi**
5. Vuotalo oo ku taal Vuosaari, **vuotalo.fi**
6. Annantalo oo ku taal Kamppi, **annantalo.fi**
7. Tiyaatarka Savoy oo ku yaal Kaartinkaupunki, **savoyteatteri.fi**
8. Caisa oo ku taal Kallio, **caisa.fi**

Kalantarka munaasabadaha ee Helsinki: **tapahtumat.hel.fi**

# Ku soo dhowow xarumaha dhaqamada!

Helsinki waxaa ku yaal sideed xarumo dhaqameed Waxaa xarumaha dhaqamada lagu qabanqaabiyaa riwaayado, bandhigyo tiyaatareed, qoob ka ciyaar iyo sirkus, bandhig filimeedyo, dhacdooyinka carruurta, xaflado wadareedyo gudaha iyo bannaanka ah iyo weliba bandhigyo iyo barista farshaxanka. Waxaad ka heleysaa waxyaabaha la bixinayo barnaamijyo badan oo lacag la'aan ah oo aanay qasab ahayn in horay la isaga sii diiwaangeliyo. Inta badan waa in tikit loo gataa bandhigyaa hoolalka, laakiin qiimuhu waa mid macquul ah. Bandhigyadu waxay ku baxayaan luqado kala duwan. Waxaa sidoo kale la bixinayaa barnaamijyo badan oo aan u baahnayn wax aqoon luqadeed ah. Xarun dhaqameed kasta waxaa ku yaal kafateeri ama maqaayad.




Sawirka: Sakari Röyskö

## Dhaqamada xaafadaha magaalada ka jira

Kanneltalo, Malmitalo, Maunula-talo, Stoa iyo Vuotalo waxay ku yaalaan deegaanno dad badan deggan yihiin oo bartamaha magaalada ka fog. Xarumaha dhaqanku waa goobo lagu kulmo oo muhiim u ah deegannadooda, kuwaas oo wakhtiga lagu qaato macariifadana lagula kulmo. Waa goobo loogu talaggalay waxqabadyo noocyo badan. Waxaad hal goob dhexdeeda uga qaybqaadan kartaa dhacdooyinka dhaqameed, ku tagi kartaa maktabadda kana baran kartaa tusaale ahaan afka finnishka ama xirfad gacmeedka koorasyada machadka waxbarashada dadka waaweyn (**faahfaahin dheeraad ka akhri bogga 28**). Waxaa Kanneltalo, Malmitalo, Maunula-talo iyo Stoa laga helaa sidoo kale xarun dhallinyaro oo ay dhallinyaradu ku qaadan karaan wakhti firaaqo oo ammaan ah iyagoo la jooga dad waaweyn oo la tababaray (**faahfaahin dheeraad ka akhri bogga 22**).

## Caisa iyo tiyaatarka Savoy

Shaqada xarunta dhaqanka ee Caisa waa horay u socodsiinta arrinta ah, in Helsinki ay noqoto magaalado sidii hore ka sii qaabab badan iyadoo la kaashanayo farshaxanka iyo dhaqanka. Waxaa tan loola jeedaa tusaale ahaan, in barnaamijyada ay Caisa ku sameeyaan farshaxaniistayaal kala duwan oo ka tirsan dadka laga tirada badan yahay iyo in lagu xisaabtamo marka dhacdooyinka lagu jiro dadka kala duwan ee magaalada deggan. Tiyaatarka Savoy waa xarun riywaadeed caalami ah. Tiyaatarka Savoy wuxuu sidoo kale mas'uul ka yahay masraxa Espa ee ku yaal bartamaha Helsinki, jardiinada Esplanadi. Waxaa masraxa Espa lagu qabanqaabiyaa xilliga xagaaga riwaayado bannaanka ah iyo dhacdooyinka kale.

## Waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada

Xarunta farshaxanka carruurta iyo dhallinyarada ee Annantalo waa udub dhexaad dhaqanka carruurta ee magaalada. Annatalo waxaa lagu baraa samaynta farshaxanka waxaana carruurta loogu qabanqaabiyaa soojeedinno, dhacdooyin iyo bandhigyo. Inta badan dhacdooyinku waa lacag la'aan. Waxaa sidoo kale xarumaha dhaqanka ee kale ka jira waxqabadyo badan oo loogu talaggalay carruurta iyo qoysaska.

## Miyaad ogeyd in?

Farshaxanka, dhaqanka iyo awoodda curintu ay saamayn wanaagsanaan ku yeeshaan tayada nolosha iyo caafimaadka qofka. Tijaabinta iyo samaynta farshaxanka ayaa sida ku cad cilmibaarisyada kahortaga jirrooyinka jireed iyo kuwa nafsadeed calaamadahana cudurka waana yareeyaan. Hiwaayadaha farshaxanka iyo dhaqanku waxay habab badan u taageeraan nololwanaagga, koritaanka iyo waxbarashada carruurta iyo dhallinyarada.





Sawirka: Shoot Hayley

# Shan warsiin oo ku saabsan waxyaabaha lagu bixiyo xarumaha dhaqamada

## 1. Munaasabadaha xagaaga

Xarumaha dhaqamada ayaa xilliga dhadooyinka badan oo lacag la'aan ah ku qabto radaayada xarumaha dhaqanka iyo fagaarayaasha. Maalinta muhiimka ah waa maalinta Helsinki 12.6. iyo Habeenka farshaxanka ee bartamaha bisha Agoosto. Annantalo waxaa xilliga xagaaga qoysaska carruurta leh loogu qabtaa barnaamijyo badan, kuwaas oo aad yara gaari karto marka adiga kugu habboon.

## 2. Wareegga sannadka iyo maalmaha xafladaha

Waxaa xarumaha dhaqanka lagu qabanqaabiyaa barnaamijyo badan oo la xiriira wareegga sannadka iyo xafladaha muhiimka u ah dadka degganayaasha ah. Halkan waa ku jira wakhtiyo muhiim ah oo inta badan la qabanqaabiyo dhacdooyinka:





- Maalinta xornimada Finland 6.12.
- Maalinta shaqaalah, xafladda shaqaalaha, ardayda dugsiyada sare iyo guga 30.4.
- Halloween kala gaddoonka Oktoobar-Nofembar
- Todobaadka xuquuqda ilmaha ee bisha Nofembar
- Fasaxyada dugsiyada ee deyrta iyo jiilaalka
- Xafladaha kirishtaanka, sida kirismaska iyo iistarka
- Xafladaha muhiimka ah ee diimaha iyo dhaqamada kala duwan, sida xafladda Ciidda ee muslimiinta. Xarumaha dhaqanku waxay inta badan xafladahan la qabanqaabiyaan ururada. Waxaa markasta sidii hore si ka badan loogu xisaabtamaa marka la joogo xarumaha dhaqanka xafladaha dadka asal ahaan kala dhaqanka ah.

## 3. Bandhigyada

Rugaha bandhigga farshaxanka ee xarumaha dhaqanka waxaa markasta yaal bandhigyo lacag la'aan lagu gelayo. Waxay furan yihiin marksta oo ay xarunta dhaqanku furantahay. Waxaa sidoo kale lagu bixiyaa bandhigyo badan oo carruurta loogu talagalay, kuwaas oo ay carruurta inta tagaan la yaabi karaan, ku dheeli karaa wax cusubna ka baran karaan.

## 4. Bandhigyada, filimada iyo riwaayadaha

Waxaa xarumaha dhaqanka lagu qabanqaabiyaa bandhigyo luqado kala duwan ku baxaya. Macluumaadka luqadda waxaad markasta ka heleysaa macluumaayada bandhigga ee bogagga shabakadda xarumaha dhaqanka. Gaar ahaan, bandhigyada sirkuska iyo qoob ka ciyaarka hadal la'aanta ah waxay ku habboon yihiin dadka aan luqadda finnishka aqoon. Riwaayadaha la dhigayo waxaa si baaxad leh loogu maqlayaa dhaqanka muusikada ee kala duwan. Xarumaha dhaqanka oo dhan waxaa lagu soo bandhigaa filimaan ku saabsan dunida dacalladeeda. Waxaa kale oo jiro bandhigyo carruurta loogu talaggalay oo ay tikidhadoodu raqiis yihiin. Ka sokow bandhigyada lacagta ah, waxaa xarumaha dhaqanka laga helaa bandhigyo badan oo lacag la'aan ah.

## 5. Koorasyada iyo hoosadaha

Ma doonaysaa in aad aqoon cusub barato dadna aad isbarataan? Waxaa xarumaha dhaqanka lagu qabanqaabiyaa hoosado iyo koorasyo badan oo kala duwan oo carruurta iyo dadka waaweyn loogu talaggalay. Waxqabadka waxaa lagu hagaa luqado kala duwan, haguhuna wuxuu inta badan hadal la'aan tusaale tusaalooyin. Waxaad waxyaabaha la bixinayo ka heleysaa hoosado iyo koorasyo badan, kuwaas oo lacag la'aan ah islamarkaana aan u baahnayn in horay la isaga diiwaangeliyo. Stoa waxaa dadka dalka u soo guuray loogu qabanqaabiyaa Opi Suomea iyadoo la heesayo - hoosadaha heesta. Hoosadaha heestu waa lacag la'aan, laakiin waa horay la isaga diiwaangeliyaa.

**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Munaasabad | Tapahtuma |
| Tikitka gelitaanka | Pääsylippu |
| Soojeedin | Esitys |
| Hoosad | Työpaja |
| Farshaxan | Taide |

# Jimicsiga

Hiwaayad ahaan u samaynta jimicsigu waxay sare u qaaddaa caafimaadka waana waxqabad nashaad keena haddii si kali ah ama wadajir ah loo sameeyo. Qaabab aad u badan ayaa Helsinki loogu jimicsan karaa.



## Bannaan ku socosho

Aad oo ku soo luga baxso jardiinooyinka, jasiiradaha iyo kaynta! Miyaad wax ka maqashay waxyaabaha qof kasta u bannaan? Finland wuxuu qof kasta xaq u leeyahay in uu tusaale ahaan miro iyo like ka guurto duurka. Bey'ada laguma samayn karo dab furan, laakiin waxaa Helsinki laga helaa balanbalooyin jiko ah iyo goobo wax lagu dubto oo sannadka oo dhan la isticmaali karo, dadka oo dhanna u furan. Xusuusnow, in aan qashin looga tegi karin bey'ada.



Sawirka: Jussi Hellsten

## Jimicsiga la hago

Waxaad ka qaybqaadan kartaa dugsiyada dabaasha, jimicsiga kooxaha, xiisadaha jimicsiga hoolka iyo jimicsiga biyaha iyo jimicsiga bannaanka. Koorasyada jimicsiga ee ay magaaladu qabanqaabiso waa kuwa raqiis ah waxaana loogu talaggalay da' kasta. Isdiiwaangelinta koorasyada deyrtu waxay billabataa bisha Agoosto, koorasyada guguna bisha Disembar koorastada xagaaguna bisha Abriil. Koorasyada waa la jecelyahay, sidaas darteed waxaa wanaagsan in wakhti hore la iska diiwaangeliyo.

Ka sokow koorasyada, waxaa sidoo kale la bixiyaa jimicsiga la hago oo aan loo baahnayn in la iska diiwaangeliyo ama ballantiisa la galo. Soo indha-indhee noocyada jimicsiga ee lacag la'aanta iyo raqiista ah, sida jimicsiga Vimma ee loogu talaggalay dhallinyarada iyo Jimcisiga soonaha (Alueliikunta) ee loogu talaggalay dadka da'da shaqada ku jira iyo kuwa waayeelka ah. Waxay dadka da' kasta jira xilliga xagaaga ka qaybqaadan karaa jimicsi ciyaareedka jardiinada ee magaalada oo dhan lagu qabto. Dadka ay awooddooda waxqabadku xaddidantahay, sida dadka muddada dheer jiran iyo kuwa naafada ah, waxaa loo qabanqaabiyaa jimicsiga lagu magcaabo jimcisga ku habbooni.



Sawirka: Jussi Hellsten

## Goobaha jimicsiga ee noocyada kala duwan loogu talagalay

Xilliga jiilaalka barafka leh waxaa magaalada Helsinki kuwa wadayaal jidadka iskii'inka oo la dayactiray. Waxaa iskii'inka ku tijaabin kartaa Paloheinä, halkaas oo aad ka amaahan karto qalabka loogu talaggalay. Helsinki waxaa ku yaal 11 karoomada barafka gacan ku samayska ah, kuwaas oo ku taraarixiddoodu aanay lacagi kaaga baxayn. Garoonka barafka gacan ku samayska ah ee Brahe waxaa ku taal meel wax kireysa oo aad ka kireysan karto kabaha barafka lagula taraaraxo.

Waxaa intaas dheer, magaaladu waxay leedahay goobo kala duwan oo jimcisiga gudaha ah, sida looxad shaageedyada iyo hoolashada jimicsiga. Hoolalka jimicsiga ee magaalada waxay ku habboon yihiin dhammaad dadka jimicsiga sameeya heer kasta ay ku jiraanba. Hoolalka jimicsigu waa kuwa qiima ahaan raqiis ah mana loo baahna in xubinnimadooda la gato. Helsinki waxaa sidoo kale ku yaal in ka badan 40 hoolalka jimicsiga bannaanka ah oo lacag la'aan ah afar iyo labaatanka saacna furana.

## Qabso goobaha jimicsiga

Waxaad kooxdaada isboortiga u codsan kartaa tookada joogtada ah ee xiili cayiman. Ka indha-indhee bogagga shabakadda jimicsiga goobaha la qabsan karo iyo wakhtiyadooda codsiga. Waxaad tookooyinka jimicsiga ee bannaan ee halhalka ah ka qabsan kartaa Dukaanka jimicsiga (Liikuntakauppa) iyo Varaamo (faahfaahin dheeraad ah ka akhri bogga 30).



**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Hoolka dabaasha | Uimahalli |
| Dhadhaqaaqid | Liikkua |
| Hoolka jimicsiga | Kuntosali |
| Kooras | Kurssi |
| Bey'ad | Luonto |

## Xeebaha dabaasha

Marka aad booqasho ku timaado xeebta, ka hubi inta ay biyuhu qodan yihiin kaartada sabuuradda ogeysiisyada. Si gaar ah isaga ilaali goobaha degdeg moolka ku noqda iyo mowjadaha xooggan. Waxaad sabbuuradda ogeysiisyada ku arkaysaa sidoo kale, haddii aan lagu talinayn in xeebta lagu dabaasho tayada biyaha oo xun darteed. Waalidku isaga ayaa markasta carruurtiisa mas'uul ka ah. Ku hay carruurta biyaha ku jirta meel laga arki karo dhammaan inta aan dabaasha aqoonna meel ay gacantu ka gaarto. Waxaa xeebaha la jecelyahay jooga xilliyada fasaxyada dugsiyada badbaadiyayaasha xeebta oo aad talo weydiin karto. Xeebaha Helsinki waxaa xilliga xagaaga lagu arkaa aljigga buluugga ah oo sun noqon kara. Horay uga hubi shabakadda xaaladda markaas jirta ee ku saabsan aljiga. Haku dabaalan xeeb lagu arkay aljiga buluugga ah.

## Hoolalka dabaasha iyo berkadaha dabaasha ee aan dadnayn

Dabaalashadu waa hiwaayadda qoyska oo dhan ee Finland laga jecelyahay. Hoolalka dabaashu waa goobo aad ku dabaalan karto, jimicsi ciyaareedka biyaha ku samayn karto, isku dejin karto waaskada biyaha diirran ku jiraan, ku ciyaari karto waaska carruurta, sawnada ka geli karto kuna qubaysan karto. Tegitaanka hoolka dabaasho waxay dhinacyo badan ka caawisaa nololwanaagga.



# Sidaan ayaad samaynaysaa marka aad joogto hoolka dabaasha

Waa muhiim in dadka oo dhan ay yaqaanaan sharciyada hoolalka dabaasha. Waxaa la doonayaa in kuwaan lagu xaqiijiyo, in qof kasta uu ku jiro xaalad ammaan ah oo wanaagsan.


1. Qubaysashada iyo dharka dabaasha ee saxda ah oo la isticmaalo ayaa muhiim ah, si biyaha waaskooyinku ay nadiif u ahaadaan. Kahor inta aadan gelin waaskada, qubeyso adigoo aan dharka dabaasha xirnayn. Timaha qooy ama isticmaal koofiyadda dabaasha. Haddii leedahay timo dhaadheer, isku xirn inta aad dabaalanayso.
2. Dharka dabaasha uga tag meesha lagu qubeysto marka aad sawnada aadayso. Inta badan Finnish iyagoo qaawan ayeey sawnada galaan. Haddii aad rabto, adigoo shukumaan xiran ayaad sawnada geli kartaa. Hoolalka dabaasha ee Helsinki waxay markasta leeyihiin sawnooyin iyo qolalka qubeyska oo ragga iyo dumarka u kala soocan.
3. Waalidku isaga ayaa mas'uul ka ah carruurta aan dabaasha aqoon. Hal qof oo weyn oo dabaal yaqaan wuxuu ilaalin karaa ugu badnaan saddex cunug oo aan dabaal aqoon. Dadka aan dabaasha aqoon waxaa lala joogi karaa oo kaliya berkadaha gunta gaaban. Berkadda weyn iyo berkadda lagu boodo waxaa la aadi karaa marka lagu dabaalan yaqaan ugu yaraan 25 mitir.

## Kuwaan waa dharka dabaasha ee la oggolyahay:






Dharka dabaasha, surwaalka dabaasha, surwaalka gaaban ee dabaasha iyo iskujooga asturan ee darafta gaaban.



# Miyaad ogeyd kuwaan?

1. Hoolka dabaasha ee Jakomäki waxaa todobaad walba lagu qabanqaabiyaa tookada dabaasha ee dumarka. Marka lagu jiro tookada dumarka, shaqaalaha hoolka dabaasha ka shaqaynayaa waa dumar oo kaliya.
2. Hoolalka dabaasha qaarkood, sida hoolka dabaasha ee Itäkeskus waxaa ku yaal qol dharka la isaga beddelo oo unisex ah dadka oo dhanna u furan. Qolka Unisex waxaa si deggan ugu labisan kara qolalka yarna isaga qubeysan kara tusaale ahaan qoysaska carruurta leh, dadka aan si buuxda u dhaqdhaqaaqi karin iyo dadka ka tirsan kuwa jinsi ahaan laga tirada badanyahay.
3. Miyaad rabi lahayd in aad dabaal barato? Dugsiyo dabaasha lagu barto oo lacag ah ayaa carruurta iyo dadka waaweyn loo qabanqaaabiyaa. Dadka waaweyn waxaa loogu talaggalay kooxo iskudaran oo dumar iyo rag ah iyo kooxo dumarka oo kaliya loogu talaggalay. Da'yarka jira da'da dugsiga dhexe wuxuu ja qaybgeli karaa dugsiga dabaasha ee lacag la'aanta ah isagoo uu sii maraya jimicsiga Vimma.
4. Haddii aad kaar xilliyeedka jimicsiga biyaha ka iibsatay hoolka dabaasha ee Pirkkola, Itäkeskus, Jakomäki ama Yrjönkatu, waxaad isla kaarkaas ku isticmaali kartaa dhammaan hoolalka jimicsiga ee magaalada Helsinki. Waxaad sidoo kale hoolalka dabaasha ee Pirkkola, Itäkeskus iyo Jakomäki ku isticmaali isla qiimaha tikitka dabaasha hoolka jimicsiga.

- → Naftaada uga hel habab wanaagsan oo aad jimicsi ku samayso: **liikunta.hel.fi**
- → Liikuntakauppa: **liikuntakauppa.hel.fi**
- → Bannaan ku socosho: **hel.fi/ulkoilu**



# Waxaa jardiinooyinka ciyaarta carruurta iyo dadka waaweyn looga helayaa saaxiibo

Jardiino ciyaar waxaa Helsinki loogu yeeraa jardiino loogu qabanqaabiyo qoysaska carruurta iyo dhallaanka yaryar iyo dugsileyda waxqabad gudaha iyo bannaanka ahoo la hagayo, noocyo badan islamarkaana lacag la’aan ah. Ka sokow banaanka lagu ciyaaro, waxaa jardiinooyinka ku yaal meelo gudaha ah.

Jardiinooyinka ciyaartu waxay furan yihiin maalmaha shaqada saacadda u dhexeysa 9–17.









Sawirka: Konsta Linkola

# Tusaalooyinka waxqabadka jardiinooyinka

Kafateeriga **Tänään tavataan** waxay horumarisaa kulamada qoysaska luqado iyo dhaqamo kala duwan ka soo jeeda, wadajir wax u qabashada iyo ku sheekeysiga afka finnishka iyadoo la joogo bey'ad wanaagsan oo aan degdeg lahayn.

Waxaa ardayda fasallada 1aad-2aad loogu qabanqaabiyaa maalin-dugsiyeedka kaddib **waxqabadka galabti** iyadoo la joogo bey'ad ammaan ah. Waxqabadka galabti waa lacag waxaana laga codsadaa Wilmada.

**Xagaaga** waxaa jardiinooyinka ciyaarta ee Helsinki ka jira waxqabadyo kala duwan oo lagu samaynayo bey'ad ammaan ah. Cuntada xagaaga ee lacag la'aanta ah waxaa la siinayaa dadka 16 sano kayar. Horay u soo qaado saxankaaga iyo malqacaddaada!

→ Ku soo degso telefoonkaaga ablikeeshinka Leikkipuistot, kaas oo aad ka heleyso macluumaadyada dheeraadka ah ee jardiinooyinka ciyaarta!

# Waxqabad dhallinyarada loogu talagalay



Helsinki waxaa ku taal in ka badan 60 goobood oo dhallinyarada loogu talaggalay: xarumaha dhallinyarada, goobaha xagaaga iyo goobo si gaar ah xoogga u saara hiwaayadaha kala duwan, sida hoolalka looxad shaagga, istuudiyowyada muusikada iyo hoosooyinka xirfad gacmeedka. Dhallinyaradu waxay tusaale ahaan noocyada isboortiga ee kala duwan hiwaayad ahaan ugu samayn kartaa hoolka hiwaayadaha ee Malminkartano, xerada xoolaha la dhaqdo ee Fallkulla ku tijaabin kartaa xannaaneynta xoolaha iyagoona sidoo kale dhacdooyin ku qabanqaabin kara goobta munaasabadaha ee Tiivistämö ee Suvilahti. Da'yar kasta wuxuu liiska ka heli karaa waxqabad wanaagsan oo isaga ku habboon.

## Xarumaha dhallinyarada

Xarumaha dhallinyaradu waa goobo ay wakhtiga firaaqada ku qaadan karaa dadka da'doodu u dhexeyso 9–17 sano. Waxaa laga yaabaa in waxqabadka hiwaayaduhu uu noqdo mid u xaddidan dadka kayar 9 sano iyo kuwa kaweyn 18 sano. Xarumaha dhallinyaradu ku yaalaan soonayaasha la degganyahay ee Helsinki oo dhan. Da'yarku wuxuu xarunta dhallinyarada kula kulmayaa asxaab, wakhtiga ayuu ku qaadanayaa, wuu ku ciyaaraa wuxuuna sidoo kale caawimaad uga helayaan noloshiisa, sida xiriiradiisa asxaabta, dugsi-dhigashadiisa iyo shaqo codsashadiisa. Wuxuu ka qaybgeli karaa waxqabad kooxeedyada, sida naadiga cunto karinta, kooraska rinjiyeynta, dalxiiska gaaban ee bey'ada, waxqabadka ciyaarta ama tartanka isreebreebka ah ee kubadda cagta. Rajooyinka da'yarta waa la dhegeysanayaan. Shaqaalaha ayaa dhallinyarada si wadajir ah ula qorshaynaya islamarkaana ula hirgelinaya waxqabadka.



## Kaarka xubinnimada sooqaado

Da'yarku wuxuu kaarka xubinnimada ku gelayaa xarumaha dhallinyarada, hiwaayadaha munaasabadaha. Kaarka xubinnimadu (waxaa hadalka caadiga ah ee finnishka ah lagu dhahaa Jässäri) waxaana loo diiwaangeliyaa qaab elegtroonig ah waxaana lagu isticmaalaa ablikeeshinka telefoonka ee Populo. Waalidka cunugga kayar 18 sano ayaa ka diiwaangelinaya kaarka xubinnimada shabakadda dhexdeeda isagoo isticmaalaya aqoonsiga xooggan. Ammaanka da'yarka dartiis ayaan waxaan u baahannahay macluumaadka xiriirka waalidka shaqaynaya, si aan horay ugala xiriirno, haddii ay baahiyi timaado. Magaalada Helsinki cid kale uma sii gudbinayso macluumaadyada da'yarka ama waalidka ee la bixiyay marka diiwaangelinta la samaynayay. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan samaysashada kaarka xubinnimada waxaad ka heleysaa bogagga shabakadda Nuorten Helsinki: **nuorten.hel.fi/jassari**.

## Kaalay oo soo booqo

Da'yar kasta waa lagu soo dhoweynayaa xarunta dhallinyarada. Wax dhib ah ma lahan, xittaa haddii aanu da'yarku weli ku hadlin finnish ama iswiidhish. Waxaa xarunta dhallinyarada markasta jooga xirfadlayaasha shaqada dhallinyarada, hagayaasha dhallinyarada oo dhallinyarada soo dhoweynaya ugana warbixinaya xarunta dhallinyarada. Hagayaasha dhallinyaradu waxay ku hadlaan luqado kala duwan, dhab ahaantiina waa la helayaa hab la wadaago oo lagu wada xiriiro. Xarumaha dhallinyarada qaarkood waxaa lagu qabanqaabiyaa waxqabad kooxeed gabdhaha u gaar ah.



## Wakhtiyada ay furanyihiin ee netka ku jira

Xarumaha dhallinyarada badankood waxay leeyahay wakhti u furan oo u gaar u kala ah da'yarta jirta da'da dugsiga hoose iyo tan jirta da'da dugsiga dhexe. Ka fiiri bogga shabakadda xarunta dhallinyarada wakhtiyada ay u furantahay kooxaha kala da'da ah. Da'yarku wuxuu imaan karaa xarunta dhallinyarada wakhti kasta oo kamid ah wakhtiyada ay furantahay intii uu rabana wuu joogo karaa. Waa la imaan karaa xarunta dhallinyarada iyadoo aan la iska diiwaangelin.

## Shan sabab oo ay tahay in uu da'yarku ku tago xarunta dhallinyarada



1. Da'yarku wuxuu naftiisa u helayaa waxqabad wanaagsan, kaas oo kaalmaynaya nololwanaaggiisa.
2. Da'yarku wuxuu helayaa asxaab cusub wuxuuna wakhti kula qaadan karaa bey'ad ammaan ah. Wuxuu baranayaa aqoonta qiimaha leh ee la dhaqanka bulshada.
3. Waxaa xarumaha dhallinyarada ka shaqeeyaa dad waaweyn oo la tababaray. Hagayaasha dhallinyaradu waxay dhallinyarada u qabanqaabiyaan lana qabanqaabiyaan waxqabad, waxay iyaga kala sheekeystaan tusaale ahaan qorshayaasha mustaqbalka iyo xaaladaha dhibaatada ahna waa soo farageliyaan.
4. Waxaa xarumaha dhallinyarada lagu tijaabin karaa hiwaayado kala duwan oo intaada badan lacag la'aan ah. Da'yarku wuxuu raadinayaa waxyaabaha uu ku fiicanyahay isagoona horumarinaya aqoontiisa ku aaddan arrimaha uu isagu xiisaynayo.
5. Xarumaha dhallinyaradu waa kuwa mukhaadaraad la'aan ah mana la oggola nooc kasta oo takoor ah, tusaale ahaan cunsuriyadda.



## Saamayn ayaad sidoo kale ku yeelan kartaa

Da'yartu waxay heystaa fursado badan oo ay saameyn kula yeelan karaan. Waxaa da'yarka loo qoondeeyay lacag ay isticmaalkeeda ka xaajoonayaan una codeynayaa sannad kasta. Lacagta miisaaniyadda dhallinyarada waxaa sannadihii hore lagu qabanqaabiyay tusaale ahaan tartanno is reebreeb ah waxaana lagu aaday tiyaataro. Da'yarku wuxuu codsan karaa gelitaanka golaha dhallinyarada, kaas oo saameyn ku leh arrimaha muhiimka u ah dhallinyarada magaalada oo dhan. Da'yarku wuxuu sidoo kale magaalada u gudbin karaa soo jeedinta arrin uu rajayn lahaa in wax laga beddelo.

→ Macluumaadyada xarumaha dhallinyarada iyo dhammaan waxyaabaha kale ee ay Helsinki dhallinyarada siinayso waxaa laga helaa bogagga shabakadda dhallinyarada: **nuorten.hel.fi**

## Hiwaayadaha lacag la'aanta ah ee loogu talaggalay carruurta iyo dhallinyarada

Nooca hiwaayadda ee Finland ayaa hiwaayado lacag la'aan ah u fidiya ardayda ku jirta fasallada 3.–9., yacni carruurta iyo da'yarta 9–15 sano. Waxaa hiwaayadaha lagu bixiyaa dhammaan dugsiyada hoose-dhexe ee Helsinki. Waxaa hiwaayadaha lagu qabanqaabiyaa maalin-dugsiyeedka kaddib qolalka dugsiyada ama deegaan u dhow.

→ Indha-indhee noocyada hiwaayadda ee ballaaran ee ku jira bogagga hore ee dugsiga cunuggaaga ama bogga Hiwaayadaha: **harrastukset.hel.fi/suomenmalli**

**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Da'yar | Nuori |
| Qaangaar | Aikuinen |
| Kaarka xubinnimada | Jäsenkortti |
| Saaxiib | Kaveri |
| Hiwaayad | Harrastus |

# Madxafka magaalada Helsinki

Madxafka magaalada Helsinki wuxuu ku yaal bartamaha magaalada, geeska Senaatintori, sekadaha ugu facaweyn Helsinki. Madxafku wuxuu furanyahay maalin kasta markasta lacag la'aan ayaa lagu galaa. Ku soo dhowow oo wakhti ku qaado iskana joog meesha hore ee gudaha ah, bandhigyada, dahcdooyinka iyo dukaanka madxafka.

Madxafka magaalada Helsinki waa madxafka kaliya ee mowduuciisu yahay Helsinki. Madxafka Helsinki waxaad ka baran kartaa wax cusub oo ku saabsan taariikhda, nololmaalmeedka iyo dhacdooyinka maxalliga ah ee magaalada. Carruurta iyo qoysasku waxay indha-indhayn karaan taariikhda magaalada waxayna ku ciyaari karaan magaalada Carruurta (Lasten kaupunki).

Haddii aad leedahay koox aad afka finnishka wada barataan, waxaad kooxdiina u qabsan kartaa hagitaanka bandhigyada madxafka magaalada oo lacag la'aan ah. Ka sokow bandhigyada, madxafka magaaladu wuxuu bixiyaa dhacdooyin kala duwan, sida wareeg socod ah oo la hagayo, muxaadarooyin, riwaayado, dhacdooyin carruureed, bandhigyo filimeed iyo iibin wadareedka kirismaska.

→ Indha-indhee madxafka magaalada Helsinki: **helsinginkaupunginmuseo.fi**



Sawirka: Jussi Hellsten

# Indha-indhee sidoo kale goobaha kale ee madxafka ee Helsinki ku yaal

## Guriga dalxiiska ee Hakasalmi

Guriga dalxiiska ee Hakasalmi wuxuu ku yaal meel u dhow Musiikkitalo, Finlandiatalo iyo Oodi ee xaafadda Töölönlahti. Madaxafka waxaa ka jira bandhigyo mowduucoodu yahay Helsinki oo isbedbeddelaya iyo dhacdooyin badan. Lacagta lagu madxafka waa 16 yuuro. Lacag la'aan ayeey madxafka ku gelayaa dadka 18 sano kayar. Dadka oo dhan lacag la'aan ayeey ku gelayaa bilkasta Jimcada u dambesa.

## Guriga Ruiskumestari ee ku taal Kruununhaka

Kaalay soo arag, nooca uu ahaa guriga uu qoyska reer Helsinki degganaa 1860:aadkii. Guriga Ruiskumestari wuxuu furanyahay xilliga xagaaga iyo jiilaalka. Gelitaanka madxafku markasta waa lacag la'aan.

## Madxafka Shaqaalaha (Duunarimuseo) ee ku yaal Vallila

Kaalay soo milicso guryihii kala duwanaa ee qoysaska dadka shaqaalaha ah ee reer Helsinki ee 1900:aadkii. Gelitaanka madxafku markasta waa lacag la'aan.

## Madxafka taraamka (Ratikkamuseo) ee ku yaal Töölö

Madxafka taraamka waxaa laga helaa waxqabadyo fiican oo loogu talaggalay carruurta iyo dadka xiiseeya taraamka. Madxafku wuxuu furanyahay maalin kasta markasta lacag la'aan ayaa lagu galaa.

**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Madxaf | Museo |
| Bandhig | Näyttely |
| Taariikh | Historia |
| Gelitaan lacag la'aan ah | Vapaa pääsy |
| Taraam | Raitiovaunu |




Sawirka: Maija Väänänen

# Waxbarashada weligeed socota

Machadka aqoon kororsiga dadka waaweyn ee Helsinki ee luqadda finnishka iyo kan luqadda iswiidhishka ee Arbis waxay waxbarasho u fidiyaan dadka waaweyn ee doonaya in ay wax cusub bartaa hiwaayadna sameeyaan.



Machad furan oo bixiya waxbarasho guud oo loogu talagalay dadkawaaweyn. Sannad kasta wax ka badan 5000 oo kooras, muxaadarooyin iyo dhacdooyin: luqadda finnishka iyo luqado kale, farshaxan sawireedyada, hawlgacmeedyada, jimicsiga iyo qoob ka ciyaarka, cunto karinta, garaacidda muusiga iyo heesidda, isticmaalka kambuyuutarka iyo qalabka dijitaalka ah, tiyaatarka, suugaanta iyo qoraalka, sawir qaadista iyo sameynta fiidiyowyada, dalxiiska gaaban ee bey'ada dabiiciga ah, iyo waxyaabo kale oo badan!



## Halkee lagu bartaa?

Goobo badan oo Helsinki ku yaal, shabakadda, maktabadda iyo goobaha furan ee waxlagu barto ee machadka.

## Yaa loogu talagalay?

Dhammaan dadka 16 sano ka weyn.

## Qiimaha waa imisa?

Qiimaha koorasku wuxuu ka bilawdaa 14 €.

Muxaadarooyinka, dhacdooyinka iyo intabadan riwaayaduhu waa lacag la'aan.



## Goormee la bartaa?

Sannad-dugsiyeedka oo dhan. Maalinti, galabti iyo dhammaatka todobaadka.

## Sidee looga qaybgeli karaa?

Koorasyada iyo iska diiwaangelintooda waxaa laga helaa cinwaanka **ilmonet.fi** ama

→ Machadka aqoon kororsiga dadka waaweyn ee Helsinki tel. 09 310 88610

→ Arbis tel. 09 310 494 94



Ka sii aqri faahfaahinta dheeraadka ah ee koorsayada loogu talagalay dadka dalka u soo guuray:

→ **tyovaenopisto.hel.fi/opiskelijapalvelut/maahanmuuttajille**

→ **arbis.hel.fi/kurser-och-anmalningar/sfi-svenska-for-invandrade**

# Waxaad sidoo kale indha-indhaysaa fursadahan wakhtiga firaaqada



## Varaamo

Ma doonaysaa in aad shir qabsato, la xafladayso ehelkaada, qabanqaabiso dhacdo, muusik duubto, qalabka muusikada garaacdo ama aad wadajir hiwaayad u samaysaan? Waxaad lacag la'aan ama qiimo jaban Varaamo uga qabsan kartaa goobaha ama qalabka magaalada. Bogagga shabakadda ee Varaamo waxay ku shaqeeyaan af finnish, iswiidhish iyo ingiriis.

→ Qabso qolal ama qalab: **varaamo.hel.fi**

## Waxqabadka iskaa wax u qabsada ah

Magaaladu waxay bixisaa shaqooyin badan islamarkaasna kala duwan oo iskaa wax u qabso ah, kuwaas oo aad ku caawin karto dadka magaalada deggan ee kala da'da ah ama aad ku daryeeli karto deegaankeena naga dhexeeya. Waxaad tusaale ahaan wakhti la qaadan kartaa dadka waayeelka ah ama waxaad caawimaad ka geysan kartaa kafateeriga qoysaska ee dhaqamada badan. Hawlo badan oo la qabto ayaan u baahnayn in la yaqaan af finnish ama iswiidhish. Haddii aad su'aal qabto, waxaad iimayl u diri kartaa cinwaanka vapaaehtoistoiminta@hel.fi. Soo dhowow oo hawsha ka qaybqaado, caawintaada waa loo baahanyahay!

→ Faahfaahin dheeraad ah ka sii akhri kana hel hawsha adiga kugu habboon: **vapaaehtoistoiminta.hel.fi**

**Baro afka finnishka!**

| | |
|---|---|
| Xaflado | Juhlat |
| Iskaa wax u qabso | Vapaaehtoinen |
| Cunug | Lapsi |
| Dugsi | Koulu |
| Bandhig-faneed | Konsertti |



# Carruurta waalid sharafeedka dhaqanka

Dhammaan carruurta reer Helsinki ee dhalatay sannadkii 2020 kaddib waxaa lagu casuumayaa in ay noqdaan ilmaha waalid sharafeedka dhaqanka. Carruurta waalid sharafeedka dhaqanku waxay sannad kasta helayaa casuumadda labo dhacdo illaa uu cunuggu dugsi ka billaabayo. Dhacdooyinku waa lacag la'aan. Waxaad cunugga la tijaabin kartaa iyado dhaqanka lagu dhexjiro wakhti fiican oo wadajir ah. Dhacdooyinku waxay taageerayaa koritaanka iyo nololwanaagga cunugga. Dhacdooyinka waxaa qabanqaabiya tusaale ahaan madxafyada, tiyaatarada iyo Orkestarada.

→ Faahfaahin dheeraad ka akhri cunuggaagana u soo diiwaangeli waalid sharafeedka: **kummilapset.hel.fi**

## Orkestarada magaalada Helsinki (Helsingin kaupunginorkesteri)

Kaalay oo dhegeyso, marka ay in ka badan boqol muusikiistayaal iskumar muusik garaacayaan. Orkestarada magaalada Helsinki waa orkesterada muusikada qadiimiga ah, taas oo bandhigga ku samaysa daarta Muusikkitalo ee bartamaha magaalada ku taal. Waxaa la iibiyaa tikidho raqiis ah oo lagu galo tababarada ugu admbeeya ee la qabanqaabiyo barqadi. Tababarka ugu dambeeya waxaa loola jeedaa, tababarka ugu dambeeyay kahor bandhigga fiidki.

→ Indha-indhee waxyaabaha laga helo orkestarada magaalada: **helsinginkaupunginorkesteri.fi**



**Tämä on somalinkielinen esite. Se kertoo Helsingin kaupungin kulttuurin ja vapaa-ajan palveluista. Kaupunki järjestää paljon sekä edullista että maksutonta tekemistä vapaa-ajalle. Esitteessä vastataan muun muassa näihin kysymyksiin:**

- **Kirjastot:** Miten voin lainata kirjoja, lehtiä ja muita esineitä?
- **Kulttuurikeskukset:** Minkälaisia tapahtumia kulttuurikeskuksissa järjestetään?
- **Liikunta:** Minkälaisia liikuntapaikkoja Helsingissä on?
- **Tekemistä nuorille:** Miksi nuoren kannattaa käydä nuorisotalolla?
- **Harrastamisen Suomen malli:** Mistä löydän maksuttomia harrastuksia lapsille ja nuorille?
- **Helsingin kaupunginmuseo:** Minkälaisia näyttelyitä Helsingin kaupunginmuseo järjestää?
- **Työväenopisto:** Missä yli 16-vuotiaat voivat oppia uusia taitoja ja harrastaa?
- **Leikkipuistot:** Mitä kaikkea leikkipuistot tarjoavat?
- **Varaamo:** Miten voin varata kaupungin tiloja ja laitteita käyttööni?
- **Vapaaehtoistoiminta:** Miten löydän itselleni sopivan vapaaehtoistehtävän?
- **Kulttuurin kummilapset:** Miten alle kouluikäisiä tutustutetaan kulttuuriin?
- **Helsingin kaupunginorkesteri:** Missä pääsen kuuntelemaan klassista musiikkia?

Kalantarka munaasabadaha ee Helsinki: **tapahtumat.hel.fi**
Maktabadda shabakadda ee Helmet: **helmet.fi**
Jimicsiga: **liikunta.hel.fi**
Waxqabad dhallinyarada loogu talagalay: **nuorten.hel.fi**
Madxafka magaalada Helsinki:
**helsinginkaupunginmuseo.fi**
Koorasyada: **ilmonet.fi**
Magaalada Helsinki (af soomaaliga): **hel.fi/so**

Helsinki